Waxaa imaan doona kuwo Madaxa oo samayndoona waxaad ku raacsan tihiin iyo waxaad ku diidan tihiinba, ófkii ku raaca wixii saxa wuu is beri yeelay, ófkii ku diida wixii khalad ahna wuu badbaadey, laakiin khaladku waa ófkii xumaha ku raaca

Umu Ṣalama, Muuminiinta Hooyadood -Allaha ka raali ahaadee- waxaa laga wariyey in Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu yiri: "Waxaa imaan doona kuwo Madaxa oo samayndoona waxaad ku raacsan tihiin iyo waxaad ku diidan tihiinba, ōfkii ku raaca wixii saxa wuu is beri yeelay, ōfkii ku diida wixii khalad ahna wuu badbaadey, laakiin khaladku waa ōfkii xumaha ku raaca oo ku raali noqda, waxay yiraahdeen: ma la diriraynaa? wuxuu yiri: maya, inta ay tukanayaan".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay inay ina maamuli doonaan Madax sameyndoona shaqo aanu naqaan waafaqsana Sharciga aanu naqaan, waxay kaloo sameyn doonaan shaqo aan ku diidayno waayo waxay khilaafsan tahay Sharciga. Qofkii qalbigiisa ka diida Munkarka ee aan awoodin inuu ka hadlo diidana, Danbiga iyo Nifaaqa beri ayuu ka noqday. Qofka awooda inuu Madaxda ku diido Gacan ahaan ama Carab ahaan ee Madaxda ku diida Xumaha wuu ka badbaaday Macsida iyo inuu ka qaybqaato Xumaha. Laakiin Qofka ka raali noqda ee ku raaca Xumaha wuu halaagsamin siday u halaagsameen. Ka dib waxay waydiiyeen Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inay la dagaalamaan Madaxda xaalkuudu sidaa yahay?, wuuna u diiday Rasuulku arinkaa, wuxuuna ku yiri: maya, intay Salaada idinla oogayaan.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/3481